# Golaha Wakiilada JSl

*Minuteska*

**Dooda Ansixinta Dakhliga gaarka ah ee adeega Madaarada.**

Kal-fadhigii 14[aad] fadhigiisii 23[aad] 20/03/2011

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 9 Mudane waxayna Socotay Maalmi kaliye, Axad 20/03/2011***

**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada:-** fadhigan oo uu Gudoominayey, Gudoomiyaha Golahan, **Hon. C/raxman Maxamed C/laahi** , ayaa u sheegay Mudayaasha ajendaha fadhigan manat ee ay u balansanaayeen Ansixinta dakhliga gaarka ah ee Adeega Madaarada. Gudoomiyuhu wuxuu sheegay in Wasaarada Duulista Iyo Gaadiiska cirku inay ugudbisay Golaha Wasiirada in la ansixiyo khidmada laga qaado muwaadiniinta ka soo dagaya ama ka dhoofaya Madaarada, sidaa daraadeed waxay ka doodeen 03/03/2011 wuuna ansixiyay fadhigii Golaha Wasiiraudu, halkii $2 ahayd waxa laga dhigay saddex dollar ($3). sidoo kale Gudoomiyuhu wuxuu sheegay in doodii Miisaaniyada 2011ka, ay mudanayaashu soo jeediyeen in $2kaa Golaha la horkeeno si loo sharciyeeyo.

Waxaana inoo soo gudbiyay Madaxweynaha, waxaa kale oo Gudida dhaqaaluhu markay eegeen Go'aanka Ansixinta Golaha Wasiirada ay soo jeediyeen in la ansixiyo oo Goluhu ansixiyo khidmadaa oo lagu keeni doono qaad xisaabeed miisaaniyadeed ( supplementary budget) si loo helo habsami u socodka shaqada madaarada,

Intaa ka dib wuxuu Gudoomiyuhu ku soo dhoweeyay Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaalaha **Md. Maxamed X. Maxamud Cumar Xaashi** inuu soo jeedintii Gudidiisa Akhriyo, isagoo Mudanuhu Mudanayaasha Golaha u akhriyay soo jeedintii Gudidooda oo loo qaybiyay Mudanayaasha.

## Doodii Mudanayaasha Golaha:-

1. **Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde:-** Wasaaradu waxay soo qortay si tafatiran baahiyaha madaarada waanay ku mahadsan yihiin, baahidaasi way jirtaa waana mid dhaba. Laakiin waxaa taa barbar socda culayska dadka muwaadinka ah ee madaarka isticmaalaya ku dhacaysa, waynu ognahay in muwaadinka madaarka ka soo dageya lagu khasbo inuu $30 sarifto oo waliba sicirka suuqu leeyahay kala badhkii loogu sarifo oo ay halkaa kaga maqan tahay %15, waxaa kaloo muwaadinka saaran tigidhka marka la iibsanayo 5% sales taxes ayaa la saaraa, lacagtaa qofkuun bay shirkadu sii saartaa, waxaa kale oo muwaadinka la

saaraa waxa aynu nidhaahno imparkation fees, oo marka diyaarada la fuulayo qofka ama laga degayo laga qaado, intaasoo dhan qofkay saran tahay.

Khidmadaha Airportka laga qaado waxaa ka mida landing fees iyo hadling charges, markaa miyay haboontahay qofkii culayskaas oo dhan ku dhacayay, ee $15 sarifkii kaga maqantahay, impartation fee laga qaadayay 5% tax ahna tigidhkiisii la saarayay in $3 isaga la saaro, $3 waa loo baahanyahay anigu waxaan qabaa $3 ha laga doono imparkation fee-ga iyo landing fees-ka, laakiin qofkii intaasi oo lacag isagii ka maqnayd in isagii lagula ciiro maaha.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** In $3 oo baahi dhaba loo qabo mid ciyaar ah maaha, laakiin cida ku haboon in laga qaadaa weeye oo $60 ee imparkation feeska ah iyo $15kaa dollar ee baanku ka qaadanayo iyo 5%kaa sales taxeska tigidhka ah, lacagtaa laga raadiyo weeye, laakiin qofka yaan lagula ciirin.

2. **Md. Maxamed Cali Xirsi:-** Marka ugu horaysa waxaan secetment garaynayaa mudanihii iga horeeyay, waxaan u mahadnaqayaa Wasiirka keenay wixii aynu ka codsanay, lacagtani lacag iminka bilaabantahay maaha waa lacag inbadan la qaadayay, waxaynu u fadhinaa waa sidaynu u xalaalayn lahay, su'aashu maaha ma loo baahan yahay? Mise looma baahna iyo badnaanteed iyo yaraanteed laakiin ujeedada aynu doonaynaa inaynu helno waxa weeye waa maxay lacagtani maxaa lagu magacaabayaa, ilayn dawladu dadka laba nooc bay wax kaga qaadaa Cashuur iyo Baryo eh.

   Markaa lacagtaa magac aan u bixino, ma cashuur baa mise maaha? Ma budget bay galaysaa?, waa in markaa magac loo sameeyo, waa cashuur, cashuurtana Xeerbaa lagu sameeyaa, mudanayaal waxaynu halkan u fadhinaa inaynu wax saxno, oo wasiirku waxbuu soo qortaye cashuurtan aan u sharciyayno, Cashuurtaa waa in magaceeda la helaa, Cashuuraha waxaa inooga masuula Wasaarada Maaliyada, oo baahida yaynaan isku mashquuline Wasiirku ha soo maro sharciyadii iyo sidaan waxan xeer ugu dhigi lahayn si sharciga iyo xeerarka waa faqsan.

   Sidaad Gudoomiye sheegtay cashuurtan waxaa ansixiyay Wasiirada oo ay soo dhaaftay, Digreetadii madaxweyne ayaa la inoogu keeni jiray ayaan filayaa, inkastoo laga yaabo inaad saxsantahay, laakiin halkan waxaa la noogu keenay wasiirku inuu soo qortay income and expenditure, Wasiirna waxa u diidaya inay wax soo qoroto oo aynu u ansixino wax u diidayaa ma jirto.

   **Gudoomiyaha point of order**, Mudane waxaan jecelahay inaan akhriyo Degreetada Madaxweynaha ayuu yidhi, Wuxuuna Golaha u akhriyay Degreetadii Madaxweynaha ee dakhliga iyo kharashkan wasaarada Duulista iyo G/Hawada, ee fadhigii Golaha Wasiirada lagu ansixiyay 03/03/2011kii ka dib markay ka doodeen.

**Md. Maxamed C. Xirsi:-** Mudane waan fahmay inkastoon naloo qaybin, Golaha Wasiirada waa laga soo ansixiyay, inaguna inaan ansixino ayaa la inoogu soo gudbiyay, markaa mudanayaal yaan la ansixin baan soo jeedinayaa waayo? Xeer maaha waa Income and Expenditure Waa Miisaaniyada wasaaradi leedahay, marka hore waa in magac loo sameeyaa oo cashuurtan magaceeda in la sameeyo qodobka ugu horeeya ka dhignaa, waa in la sheegaa ujeedada lacagtaa aynu magacawnay iyo Rateka lacagtaa ee la qaadayo waa in la sheegaa, $2 ama $3 ha noqotee.

Sidoo kale waa in la is waydiiyaa cid kasta oo madaarka ka soo degaysa lacagtaa ma laga qaadayaa mise laga wada qaadi mayo waa in la is waydiiyaa,

Dunida waa la iska qaadaa, habka loo qaado ayaa ka duwan habkan aynu iminka doonayno, Matalan caruuta yar yar ee diyaarada soo raacda aan kursiga fadhiisan waa laga reebaa, disableka waa laga reebaa qofka diyaarada wada waa laga reebaa, sidoo kale lacagtan waxaa qaadaya wasaarada maaliyada oo ay khasab ku tahay inay galiyaan budgetka ama supplementary ha galiyeene, Xeerka aynu doonayno inaynu ansixino yaa laga qaadaa, laba siyaabood baa loo qaadaa:- qofka waa laga qaadaa oo Wasaarada Maaliyada ayaa ka qaadaysa, diyaaradana waa laga qaadaayoo sida ugu qurux badan dalaka badankooda sida looga qaadaa waxa weeye diyaaradaa la chargegareeyaa markay tigidhka uu qofku wax iibsanayo ayaa laga qaadaa oo Wasaaradu bilkasta la xisaabtantaa.

***Waxaan Soo jeedinayaa:-*** in xeerkii cashuurtan lagu qaadi lahaa la keeno, oo wasaarada maaliyada dib loogu celiyo, iyana Xeer ha inoo soo draft garayso, markaa aan xeer ahaan ha inooga baxo.

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaasha aan markale ugu celiyo, Mudanayaashaa codsaday, Maxamed Calina waxaad ka mid ahayd mudanayaashii soo jeediyay ee codsaday in Golaha la horkeeno si loo sharciyeeyo. Wasaaradu waxay aqbashay codsigii Golaha oo waxay Golaha Wasiirada ugudbisay si ay uga doodaan una ansixiyaan ka dibna Madaxweynuhu inaguu inoo soo gudbiyay, mudanayaashu xaq bay u leeyihiin doodooda.

3. **C/raxmaan Maxamed Jaamac:-** Horta boodada hore, waxaa keenay warqadaa naloo qaybiyey, iminkuuna Gudoomiyuhu akhriyoo wuu naga shaafiyay, waxaa halkaa ka muuqda in wasaaradii dakhli soo codsan karto waxayna ka hor imanaysaa Dastuurka iyo sharciga, arrinkani culays wayn buu saarayaa dadka, oo $2 buu awal ahaaye $3 ayaa laga soo dhigay iminka, dawladii hore waxay ku andocoon jirtay inay tahay tabaruc qofkii doonaa bixin karo, laakiin iminka waxaa la yidhi ha la ansixiyo,

Doodii miisaaniyada waxaan soo jeedinay kayd qaran in la sameeyo, waxaa la yidhi xeer ha loo sameeyo, maxaa diidaya in tana xeer loo sameeyo?, dadka waxaa laga qaadaa

Imparkation fees, sarif kan suuqa badhkii loogu sarifo iyo parking fees, Hay'ada NASHA waxay qaadaa Handling charge 15% dawladay ku shubtaa,

Wasaarada Duulista iyo G/Hawadu way baahan tahay adeegaa waxay ku qabato, waxaana Miisaaniyada ugu jirta **2,213, 831,520** oo wasaarado badan bay ka dakhli badan tahay,

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** In xeer loo sameeyo, oo aan $3 la iska ansixin ayaan soo jeedinayaa anigu.

**Point of Order ayuu Gudoomiyuhu** qaatay oo wuxu sheegay inaanay Wasaaradu soo dirin ee uu Madaxweynuhu Degreeto ku keenay.

4. **Md. Siciid Cilmi Rooble**:- Horta Gudoomiye, Waraaqdaa Madaxweynaha ee ka maqnayd lifaaqa xildhibaanada loo qaybiyay ayaa waxaas oo buuqa dhaliyay, markii horena lama qaybin oo wasiirka warqaduu soo gudbiyay oo aan digreetadii madaxweynahu la socon ayaa waxaas dhiba keentay, iminka processkii aan islahaa wuu khaldanyahay, iminka wuu saxsanyahay, laakiin laba arrimood ee aan iswaydiinaynaa waxa weeye, midi waa fikiradii C/qaadir ee ahayd ha laga dhimo muwaadinku qaadi karimaayee, midina waxa weeye aynu ansixino, horta labadaa dollar bilaa sharci bay ahayd, iminkana $3 baa laga dhigay.

   ***Markaa anigu waxaan leeyahay:-*** Saddexdaa dollar ($3) ee preccesska soo martay aynu ansixino, wa bilaahi tawfiiq.

5. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Markii hore waxaa la lahaa $2 ha la keeno, iminkana waxaa laga dhigay $3, barigii hore wasaarada Duulista iyo G/Hawadu waxay qaadi jirtay Handling charges, handling chargeskii waa lagala wareegay oo waxaa la wareegtay NASHA, qaybtii kale ee Imparkationkana waxaa qaada Wasaarada, markaa waxan leeyahay ha loo celiyo wasaarada handlingkii ay qaadi jirtay si ay uga maaranto dadka inay wax ka qaado, miisaaniyadana ha lagu daro oo ha soo marto meesheedii.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** $2 baan ka caranaynaye yaan saddexdaa dollar ($3) la ansixin.

6. **Md. Dr. Cali Yuusuf Axmed:-** horta xukuumada cusubi way ku mahadsantahay arrinkani waana ku mahadinayaa, markaa inagu inaynu wax eegno ayaa loo baahan yahay oo laba dhinac eegno, dakhli xukuumada inaynu eegno waa loo baahan yahay oo ah tan wax lagu kala wado, dadweynahana inaynu eegno waa loo baahan yahay oo culays badan aan la saarin, cashuurkasta oo la bixinayona waa inay micno yeelato oo magacyada tan Airaportiska laga qaado ay la mid noqoto.

   Airportyada lacag Visa ah ayaa laga qaadaa hadaanu dibada ka soo qaadan Visaha, laakiin dadka dhoofaya Airport tax ayaa laga qaadaa, muwaadin ama ajaanib kuu doona ha noqdee,

inkastoo wadamada qaarkood dadka wadaniga ah lacag fudud laga qaado, dadka ajnebiga ahna lacag siyaadaha ah laga qaado sida dalalka jaarka ah ee jabuuti iyo Kenya oo kale.

Anigu waxaan odhan lahaa airport tax dadka dhoofaya laga dhigo, laakiin dadka soo degaya already lacag ayaa laga qaadaa, markaa dadka soo degaya in laga daayo ayaan qabaa, wasaaradu waxay sheegtay in lacagtaa airportka xoolaha laga ilaaliyo dhirtana lagu waraabiyo, markaa wax la qaadayo wax la iska soo qorto yaanay noqon oo dawladu aanay iska samaysan, hadii kale wixii fawduu noqonayaa,

***Waxaan qabaa anigu:-*** Hab xisaabeedku waa inuu meel ka socdaa oo Wasaarada Maaliyadu u samaysaa Funds gaara Airportska, oo lagula xisaabtamaa wixii baxay oo kharashkooda Wasaarada Maaliyadu ugu dartaa. Sidaana lagu pass gareeyaa lacagtana Wasaarada Maaliyadu qaadaa.

***Point of Clarification:-*** **Md. Axmed Weyne.** Anigu waxaan u kacay inyaroo sixida, waxaad moodaa in lagu confuse garoobay in wasaarada aviationku lacagtan toos u qaadayso, waxaa weeye sidaan soo qornay waxaanu nidhi supplementary budget ha lagu sameeyo miisaaniyadii la dabageeyo, taasna wasaarada maaliyada ayaa xukunta, lacagtana waxaa qaaadi kara Wasaarada Maaliyada ama Aviationka oo hadii aviationku qaado lacagta waxay ku xeraynaysaa, Wasaarada Maaliyada iyo accountkii loogu tala galay, Wasaaradan Aviatiokuna Service bay lacagtan u soo dalbatay, adeeguna waa wax mar walba deg dega oo aan fojar aan sugin, taa lafteeda qaab loog baxay leedahay oo waxay impress waaran ayaa lagu siinayaa ssaddexdii biloodba mar dabadeedna maraky lacagta isticmaasho ayay dib u soo samaynaysaa lacagtay isticmaashay. Markaa waxan hab xisaabkeedii iyo nidaakii dawliga ahaa wuu maraya sidaa ula socda.

7. **Md. Axmed Yaasiin S. Cali Ayaanle:-** waxaan doonaynaa inaan cadaynaa waxaa weeye markii wasiirka hore soo saaray $2 ee gudiddii dhaqaalaha ee Goluhu ay sanad miisaaniyadeedkii la kulmeen dabadeedna way ku soo qanceen in lacagtaa Madaarku u baahan yahay, warbixintoodii waxay inoogu soo dareen, markay wasiirka la kulmeen ee madaarkii soo aragnay waanu ku qanacnay in labadaa la qaado, waxaana wasiirka ka codsanay in boodhadh aanu madaarka ku dhajiyaan ay labadaa dollar inay tabaruc yihiin sheegaya, tabarucuna wuxuu ka dhiganyahay qofkii helaya in laga qaado.

   Markaad tax kordhinayso ha u qaadan dadka soo degayaa wada tijaar inay yihiin, tax la kordhinayo waa in lagu saleeyaa standard levelka nolosha dadka laga qaadayo, mujtamac less $1 ay ka yartahay qofkii dakhligiisu in la saaraa $1 la saaraa way ku culustahay, $2 bilaa sharciga ahaana in la sharciyeeya way ila haboon tahay, tan kale

procedureka dawladeed waxa weeye wixii maaliyad (financial) ah waxaa ku shaqa leh Wasaarada Maaliyada.

Maanta dadkeenu abaaray ku jiraan wayna ku culustahay $1 in lagu kordhiyaa, inaga Gole ahaan tax kordhay inay halkan ka baxaa maaha ayaan qabaa, $2 oo budgetka wasaarada Maaliyada ay Wasaarada Duulista ugu talagashay ay ku jiraan ha ina soo maraan, yaanay sharci noqonin in wasaarad aan maaliyada ahayni ay tax qaado.

***Waxaan qabaa anigu:-*** in sharcigani ka yimaado Wasaarada Maaliyada, oo ha inoogu yimaado sharci cashuureed, markaana aynu ansixino.

***Point of correction*:-** Gudoomiyhu markale wuxuu saxay, in Wasiiradu Golaha Wasiirada ka mid yihiin, Madaxwaynuhu soo Gudbiyay.

8. **Md. Maxamed Jaamac Cilmi:-** Horta yaynaan labadan dollar ($2) kula qaybsamin, wixii maslaxadu ku jirto iskaga mid baynu nahay, meel walba in wax lagu xagaajiyo waa loo baahanyahay, anigu afar nuqdadood uun baan doonayaa inaan ka hadlo:-
   - Waxaa noqonaya cashuur waa inay yeelataa qodobo sharci ah, oo qofka qalinka hayaa aanu ku darsan sida:- ninbaa soo degaya 5 caruura wata intaba waa laga qaadayaa, sharciyada maaliyaduan waa sidaa oo hadii xaraf isbadalo wuu is wada badalayaa.
   - Waa inay jiraan derajaad cayiman oo wixii lagu qaadi karaa iyo cida laga qaadaya, waan jeclahay in madaarka la hagaajiyo.
   - Qofku markuu soo dego waxaa loo sarifaa $30 oo kala badh loogu sicirka sarifka loogu sarifo **(80,000)** taasi way idin wada dhaaftaye yaa ansixiyay.
   - Marka hore xaqqa waa in la siiyo talaabooyinka aynu u marayno oo la saxaa.

   ***Waxaan leeyahay anigu*:-** Gudoomiye, Wasaaradu ha soo qorto Derejaadka, Tartiibta, dadka laga qaadayo iyo dadkaan laga qaadayn, waxaana aniga ila wanaagsan sida aduunka kaleba qofka soo degaya inaan waxba laga qaadin, markaa Gudoomiye arrinkaa dib ha loogu noqdo, tii bangigana qolada dhaqaalaha waxaa la rabaa inaad keentaan oo iyana sidaa si le’eg aan ugu sharciyayno.

9. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** marka hore waan mahad celinayaa Gudidda dhaqaalaha ee warbixintan soo qortay, marka laga hadlayo Takaaliifta iyo arrimaha Cashuuraha arrin dastuurku ina siiyay oo Qoboka 55$^{aad}$ far, 1$^{aad}$ ee dastuurka ayaa sheegaysa, waxaana jira daariiq loo maro iyo si ay inooga baxaan, sidaa darteed waxaa laga maarmaan ah in takaaliifta mark sidaa loo jidaynayo inay xeer soo marto, oo qaab xeer inoogu timaado inagana baxdo, oo digreetada madaxweynaha lafteed ayaa xeera.

Anigu waxaan hoosta ka xariiqi lahaa arrinta gudiddu soo jeedisay, iyadoo dastuurku inoo tilmaamayo inay marka hore u soo jeediyaan qaab xeer, ee aanay qaad soo jeedin kaliya noqon, tan kale aan ka hadlayaa waxa weeye inay lagama maarmaan tahay in madaarku u baahan yahay $3, ujeedadii ugu horeysay ee arrinkan loo soo dejiyay baahi bay ahayd madaaradu u qabtay, waana la iswaydiiyay hadii la sharciyeeyo budget bay soo maraysaa oo wada dheer bay soo maraysaa marka taasi waxay baahi saamayn ku yeelanayso in la is weydiiyo ayaa loo baahan yahay,.

***Waxaan soo jeedinayaa*:-** 1. In waxani hadii uu takaaliif yahay Xeer noqdo, oo sidii xeer noqdo ayaan soo jeedinayaa .2. Anigoo dhinac qofka muwaadinka ah ka eegaya in aan culays la saarin.

Dhamaad.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agg. Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada JSL.**
---------------------------------------------------------

**Jamaal Jaamac Jiir**
**Ku-xigeen, ahna ku simaha X/Guud ee Golaha wakiilada JSl**
---------------------------------------------------------------